


Taxanihii Afraad ee Fashil Wadareed

# Adeegsiga Nidaamka Caddaalad Ciqaabeedka si Wax Looga Qabto Hab-Dhaqanka Bulshada ka soo Horjeeda & Danbiyada Yaryar ee ay Carruurtu Galaan

March 2021

# Hordhac

Inta badan Carruuta iyo dhallinyarta xabsiyada Somaliland ku jirta maantu waxa lagu xukumay danbiyo aan aad u cuslayn ama hab-dhaqan bulshada ka soo horjeeda oo ay ku kaceen. Qaar badan oo iyaga kamid ah waa markii koowaad ee ay sharciga ka hor yimaadaan. Marka carruurta iyo dhallinyartu is-dagaalaan, wax xadaan, dugsiga ka tagaan, guriga ka baxsadaan, mukhaadaraadka isticmaalaan ama ay la soo deristo dhibaato dhanka dhimirka ahi, waxa waajib ah in aynu dhammaanteen ka hawlgalno ama jiraan barnaamijkii wax lagaga qabanayey. Nidaamka caddaalad ciqaabeedku dhab ahaantii waxa uu door muhiim ah ka ciyaaraa sidii loola tacaali lahaa danbiyadaa culus iyo qalalaasaha. Balse, inta badan, qoysasku waxa ay miciin ka dalbadaan booliska, maxkamadaha iyo xabsiyada si ay uga fakadaan masuuliyaddii carruurtooda ka saarnayd, ama iyaga oo dhab ahaan culays badani saaran yahay oo ayna awoodin in ay la tacaalaan caqabadahaas.

Maadaama ay maqantahay adeeggii bulshada ee ay dawladdu bixin lahayd, saraakiisha booliska waxa laga filanayaa in ay u dhaqmaan sidii dadka ka hawlgala arrimaha bulshada, doorkan oo ayna tababarna u helin agabkii iyo khayraadkii ay ku hawlgeli lahaayeena ayna haysan. Intaa waxa dheer, jawaab-celintoodu waxa ay noqotaa in ay duubaan ama xidhaan kooxaha dhallinyarada ah si ay dhibta uga fogeeyaan ama ay u ciqaabaan iyaga oo fulinaya codsiga qoysaskooda. Sidoo kale waxa sameeya xeer-illaaliiyaasha iyo garsooreyaasha kuwaas oo isu arka in ay fulinayaan waajib qaran marka ay dacwadda ku soo oogayaan, xukumayaan isla markaana ay u dirayaan xabsiga mudada dheer ah dhallinyartaas "si ay cashar u baraan."

Habkan caanka ahi waxa uu leeyahay cawaaqib xun, gaar ahaan marka la tixgeliyo cidhiidhiga iyo duruufta adag ee ka jirta saldhigyada booliska iyo xabsiyada kuwaas oo ay yartahay in ay leeyihiin qayb u gaar ah carruurta ama qayb waxbarasho iyo tababar lagu siiyo dhallinyartaas. Qolalka saldhigyada booliska iyo xabsiyadu jidh ahaan iyo maskax ahaanba dhaawac ayay soo gaadhsiiyaan dhallinyartaas wayna yartahay fursadda in iyaga oo fayow dib ugu noqdaan bulshadii.Waayahaa qalafsani waxa uu kala dhantaalaa waxbarashadoodii taas oo saameyn ku yeelata shaqadii ay mustaqbalka qaban lahaayeen. Waxa ay dhaawacdaa sharaftoodii iyo xirfadoodii waxayna yaraysaa fursaddii ay dib ula midoobi lahaayeen bulshada. Culayska ku dhacaya qoysaska — mid dhaqaale, mid caadifadeed iyo waqtiga ka baxayaaba — waa mid aan la qiyaasi karayn.

Habka waqti xaadirkan ee awoodda la saarayo in saldhigyada lagu hayo ama xabsiyada loo taxaabaa waxa uu sidoo kale culays ku yahay xukuumadda Somaliland. In laga leexiyo nidaamka caddaalad ciqaabeedka dhallinyarta markoodii koowaad danbi

ku dhacday ee gaystay danbiyo fududi waxa ay badbaadin lahayd lacag badan oo la gelin lahaa waxbarashada iyo adeegga bulshada. Hiigsiga fog, in kastooy kooban tahay waxay horseed kartaa in bulshada laga illaaliyo danbiga. Taas lidkeeda, in lala xidho dhallinyarta dadka waaweyn ee danbiyada galay, fursad waxa ay u siinaysaa in ay ka soo baxaan xabsiga iyaga oo soo bartay aqoontii ay ku gaysan lahaayeen danbiyo kuwii hore ka culus.

In ubadka loo diro xabsigu xal maaha. Waalidka, qoyska, hogaamiyaasha bulshda, barayaasha iyo adeegeyaasha bulshada ayaa ah goobtii ugu habboonayd ee lagula tacaali lahaa dhaqankaa aan bulshadu aqbalayn.

Wax ka muhiimsani ma jiro in aynu daryeelno ubadkeena marka ay ugu baahi iyo nuglaansho badan yihiin. In la soo afmeero meertadan burburka horseedaysa, waxa ay u baahan tahay hoggaamin xukuumadda ka timaada oo lagu dejiyo, fuliyo laguna kormeero istaraatiijiyadaha la doonayo in ***lagaga hor tago*** hab-dhaqanada xadgudubka ku ah bulshada ka hor inta ayna gaadhin nidaamka caddaalad ciqaabeedka. Qoyska, dugsiga, xukuumadda iyo bulshadu dhammaantood waa in ay ka wada shaqeeyaan ka hortagga iyo sidii loo daryeeli lahaa ubadkaa iyo qoysaskooda aan awoodin in ay la tacaalaan dhibtaas.

Warbixintani waa qaybtii afraad oo kamid ah taxane shan qaybood ka kooban, *Fashil-wadareed: Sida uu Hanaanka Cadaaladda Danbiyada ee Somaliland uu u Waxyeelleeyo Carruurta iyo Waxa aan Ka Wada Qaban Karno*. Ujeedada taxanuhu waa sidii loo abuuri lahaa in dadweynuhu u dhug yeeshaan isla markaa ay kalsooni yeeshaan ay ku soo bandhigaan caddaalad darradaas. Afarta mawduuc ee kale waxa ay kala yihiin: maxay sharci darro u tahay in la ciqaabo carruurta 14 jir iyo ka yar ee ku xusan Taxanaha Koowaad; sida carruurta bilaa sabab loogu taxaabo xabsiga inta kiiskoodu ka socdo maxkamadda ee ku xusan Taxanaha Labaad; sida garsooreyaashu ugu ciqaabaan caruurta wakhtiyo dhaadheer oo xabsi marka loo eego dambiyada yar-yar ee ku xusan Taxanaha Saddexaad; iyo tallaabooyinka ay hadda qaadi karaan dadka ka shaqeeya nidaamka caddaalad ciqaabeedku, iyaga oo aan eegaynin inta yar ee dhaqaalaha haysata, si loo xaqiijiyo in ilmo kasta loola dhaqmo inuu yahay ilmo yar ee ku xusan Taxanaha Shanaad.

# Nidaamka Caaddaalad Ciqaabeedka oo u shaqeeya sidii Adeegga Bulshada

Sida ka jirta waddamo badan, waxa jira fikir dadweynaha reer Somaliland oo baahsan kaas oo ah in 10-kii sanno ee tegay ay isa soo tarayeen ubadka iyo dhallaanka ku kacaya danbiyada gaar ahaan magaalooyinka kuna kacaya danbiyo culus. Qoysasku way sii burburayaan iyada oo ay ugu wacan tahay furriinka iyo kala tagga sii badanaya, maqnaanshaha Aabeyaal badan ay ka maqan yihiin noloshii ubadkooda, culayska dhaqaale ee ku qasbaya hooyooyinka in ay ka soo shaqeeyaan saacado badan guriga dibaddiisa, waxbarashada tayadeedu hoosayso, saacadaha yar ee ay ubadku dugsiga joogaan, caajisnimada iyo iyada oo ay aad u yar yihiin goobihii madadaalada ee isboortiga, telefoonada gacanta lagu qaado oo bulshada dhexdeeda caan ka noqday, qaadka iyo mukhaadaraadka, faqriga iyo in ayna jirin goobo jimicsi oo bilaash ah ayaa loo aqoonsaday in ay horseedeen hab-dhaqanka bulshada ka soo horjeeda in ay ubadku ku tallaabsadaan. Kharashka dugsiyada iyo jaamacadaha oo aad u sii kordhaya waa arrin kale oo ku khasbaysa ubadkaasi in ay ka tagaan dugsiyada iyo jaamacadaha kuna danbeeyaan dariiqyada halkaas oo ay sarrayso fursadda ay sharciga kaga hor iman karaan.[1]

Sidaa darteed, shaqo-la'aanta dhallinyartu aad ayay u sarraysaa wayna kooban yihiin fursadaha tababarka xirfadaha iyo farsamooyinka gacanta ee ay heli karaan dhallinyartu. Sidaa awgeed wax lala yaabo maaha in dhallaan badani ay ka niyad jabaan fursadahaa aan jirin ee dadka qaar aaminsan yihiin in ay jiraan. Cunista *qaadk*,[2] ku biirista kooxaha dagaalmaya iyo galida danbiyada fudud sida dhaawac, dagaal safayn ah, tuugo iyo budhcad, waxa ay noqotay wax xiiso geliya oo ay geliyaan waqtiga badan ee faraaqada ah ee ay haystaan.

Somaliland waxa ay leedahay dhawr goobood oo bixiya adeegga bulshada oo caawin kara dhallinyartaas, goobahaa yar ee jirana waxa ku yar dhaqaalaha. Waalidku ma haystaan meel kale oo ay ku ciiraan oo ka baxsan inta qaraabada dhaw ah. Duruufahani waxa ay burburinayaan gaar ahaan qoysaska isku duubnidoodu hoosayso cid gacan-qabataana ay yar tahay ama ayna jirinba. Dugsiyada iyo goobaha waxbarashadu waa meel gabbood u noqon karta. Balse, kiisas badan inta ay taageero u fidin karaan aad ayay u kooban tahay. Dugsiyada xukuumaddu aad ayay u hoosaysaa dhaqaalaha ay haystaan macallimiintuna waxa ay la tacaalaan ardayda aan soo xaadirayn dugsiga, iska dhaaf in ay daryeel u fidiyaan ubadkaase. Xataa dugsiyada gaarka loo leeyahay lagama yaabo in ay leeyihiin la taliyeyaal dhanka waxbarashada oo tababaran.

[1] *Way adag tahay in la illaawo: In lala tacaalo Rabshadaha Dhallinyarta Hargeysa ee Degmada Maxamed Mooge*, daraasad ay baahisay Machadka Nabadda iyo Xallinta Khilaafaadka ee Jaamacadda Hargeysa, waxa ay xog fiican ka bixinaysaa dib-u dhaca dhaqan-dhaqaale ee dhallinyarta rabshadaha sameeya maanta Somaliland.
[2] Si joogto ah oo loo cuno caleenta qaadka, oo ah walax dareenka kicisa, waxa ay sababi kartaa dhibaato caafimaad iyo saameyn maskaxeed o oculus.

Tani waxa ay sababtay, in waalidiintii, xubnihii qoyska iyo macallimiintii ay u jeestaan dhankaa iyo nidaamka caddaalad ciqaabeedka si ay ula dagaalamaan hab-dhaqankaa bulshada ka soo horjeeda iyo dhallaanka xadgudubyada ku kacaya. Mararka qaar, booliska ayaa u dhaqma sidii ay yihiin kuwii bixinayey adeegga bulshada, kuwaas oo ku dhiiri geliya in ubadku ku negaadaan dugsiyada isla markaa ay danbiyada fudud ku xalliyaan heshiis xeer-dhaqameed ah oo ka baxsan kan nidaamka caddaalad ciqaabeedka. Mararka qaarna, iyaga oo aan haystan dhaqaale ay wax kaga qabtaan cabashooyinka bulshada iyo in ay baadhaan hab-dhaqankaa bulshada ka soo horjeeda ee ay ku kacayaan dhallinyartaasi, si fudud ayay boolisku u xidhaan kooxahaa dhallinyarta ah iyaga oo dhammaantood ku xidhaya saldhigga booliska, iyada oo aan loo eegayn in shakhsiyan danbiga ay galeen iyo in kale. Habkan, bulshadii waxa ay ku tiirsan tahay booliska oo u galay kaalintii adeegayaasha bulshada.

Marka la hawlgeliyo nidaamka caddaalad ciqaabeedka, qoysasku waxa ay u arkaan hay'adaha caddaalad ciqaabeedka – booliska, xeer-ilaaliyaasha, garsooreyaasha iyo saraakiisha xabsigu in ay tallaabo qaadaan. Sida booliska oo kale, dhaqaalaha ay maxkamaduhu haystaan aad ayay u kooban tahay, wayna ku adag taha in si wax-ku-oolnimo ah ay u gutaan waajibkoodii ahaa in ay dhallinyartaa bulshada dib ugu celiyaan una yareeyaan danbigii ay ku kacayeen. Xeerka 2007 ee Garsoorka Carruurtu waxa uu siinayaa garsooreyaasha dhawr fursadood oo lagula xisaabtami karo dhallinyartaas marka ay xeerka jabiyaan, oo ay ku jirto in ay shaqo fiican ka dhex qabtaan bulshada, dugsiga aadaan, cudurdaar rasmi ah jeediyaan ama si waafaqsan xeer-dhaqameedka ay magdhaw siiyaan dhibanaha, maqnaanshaha adeegayaashii bulshadu iyo saraakiishii xadhig ka leexinta ee korka kala socon lahaa waxa ay ka dhigtay in fursadahaa aan xabsiga ahayn ay yihiin qaar adag in la amro korkana lagala socdo. Tani waxa ay garsooreyaashii culays ku saartay in ay joojiyaan hab-dhaqankaa bulshada ka soo horjeeda iyaga oo xabsi u dira. Hay'adda Horizon waxa ay kaga hadashay arrintaa warbixin la faafiyey June 2018, *Rabshadaha Caruurta iyo Xadgudubyada Somaliland: Waa maxay sababta Xabsiyayntu u tahay Falcelin Qaldan*, " Ku lug lahaanshaha xooggan ee hay'adaha sharci fullintu ee dhallinyartaa dhibaataysan ayaa sii xoojinaya dhibaatadan lafteeda."

Dhaqan-celintu waa hadaf ku xusan nidaamka caddaalad ciqaabeedka, in la aamino dhallinyarta oo xabsiga loo taxaabaa in ay bulshada ka badbaadinayso danbiyada isla markaana ay yaraynayso dambiyadii ay mustaqbalka gaysan lahaayeen. Dhaqan-celinta kaliya waxa lagu guulaysan karaa haddii xabsiyaynta loo isticmaalo in marka ilmaha la siidaayo uu dib ula falgeli karo bulshadii, ay horseedi karto in uu sharciga u hogaansanaado naftiisana anfaco.

Balse ma jiraan xarrumo lagu dhaqan-celiyo carruurta oo daryeel iyo cuntaba u fidisa ubadkaas. 25 April 2018, Wasiirkii Caddaaladda ee waqtigaas ayaa dhagax dhigay dib-u habaynta xarruntii hore ee dhallaanka ee u dhawayd Berbera. Illaa waqtigaas, wax tallaabo dheeraad ah lama qaadin. Waxa jira xarrumo gaar loo leeyahay oo loo yaqaano "Cilaaj" kuwaas oo lagu eedeeyey xadgudubyo baahsan oo ka dhan ah xuquuqal insaanka. Ama waxa jiro xabsiyo. Marka xabsiga aad gashid, fursaddii dhallaanka dhaqan celin loo samayn lahaa gebi ahaanba ma jirto.Waxa jira fursado waxbarasho iyo farsamo oo kooban oo ay dhalinyarta xukuman ka heli karaan xabsiyada, balse inta badana waxa la siiyaa kuwa ku xukuman mudada dheer ee gaystay danbiyada culus. Tani waxa ay ka dhigan tahay dhallaanka xabsiga ugu jira danbiyada sida waalid-caasinimada ama telefoon ay xadeen wax waxbarasho ah oo ay ku helaan xabsigu way yar tahay ama maba jirto. In xabsiga loo taxaabo dhallinyartaasi way yar tahay in ay bulshada ka badbaadiso danbiga.

## Qodob qayb ka ah In Carrurta lagu hayo Saldhigyada Booliska iyo Xabsiga: Qodobka Sharci ee "Waalid-Caasiga"

In aad waalid u tahay qof dhallinyaro ah oo ku lug leh hab-dhaqan iyaga dhaawacaya, khatar galinayana mustaqbalkoodu waa mid aad u adag. Tani waxa ay si gaar ah run u tahay marka uu noqdo hab-dhaqankaasi fal danbiyeed ciqaab ah. In la waajaho dhallinyaro aan is xakamayn karayn, oo aan haysan gacan caawimo u fidisa, waa la fahmi karayaa sababta ay miciinka uga dalbanayaan booliska iyo maxkamadaha.

Ku tagri falka waalidka iyo qoyska ee nidaamka caddaalad ciqaabeedka si ay u anshax mariyaan una ciqaabaan carruurta ama uga jaraan cunista qaadka ay ku mameen iyo mukhaadaraadka kale waa qaar ku cad sida ay dhigayaan qodobada sharciga ee "Waalid-caasiga" Erayada loo isticmaalay si qiil loogu helo doorashadoodu waa mid xog ku duugan tahay. Waxa kamid ah rajada in "loo cabsi galiyo/si ay u dhegaystaan," ama " in la tuso waxa ku dhaca danbiileyaasha" iyo " in baahida cunista *qaadku* jidhkiisa ka baxdo."

Waalid-caasigu waa sababta ugu caansan oo ay carruurtu ugu danbayso gacanta booliska, xeer-illaalinta, maxkamadaha iyo xabsiga. Qodabada Xeerka Illaalinta Anshaxa iyo Nabad Galyada Guud ee 2012 [3] waxa uu ka hor imanayaa dastuurka iyo XNGC. Waxa ay rabaan in ilmuhu noqdo shan iyo toban sanno ama ka weyn dacwaddana lagu qaado Maxkamadda Degmada, xukunka ugu dheer ee lagu ridi

[3] Xeerka Illaalinta Anshaxa iyo Nabad galyada Guud Xeer Lr 51/2012 (Xeerka Illaalinta Anshaxa) Qodobka 33(3).

karaana uu noqdo lix billood. Balse, dhab ahaan qoysas badani waxa ay u tagaan booliska si ay u xidhaan ilmahooda sifo aan rasmi ahayn.

Xadidaadaha sharci ee isticmaalka Waalid-caasigu waa qaar si joogto ah loo jabiyo, si carruurta ka yar shan iyo toban sanno loo xukumo, sida diin cayga, khamriga ama handadaada dabka ama dilka waxa ku dara xeer-illaalinta iyaga oo fulinaya codsi uga imanaya qoyska si loo dheereeyo mudada xabsiga. Sidaa awgeed, carruurtu waxa ay waqti dheer illaa saddex sanno ah ku qaataan xabsiga. Carruurta oo aan inta badan haysan cid sharci ahaan u matesha, inta badan ma joogaan marka dhegaysiga dacwaddu ka socoto Maxkamadda Degmada, marka ay joogaana, sidii oo ay danbiileyaal yihiin ayaa su'aalaha loo weydiiyaa. Kiisaska intooda ugu badan, markhaatiga kaliya ee joogaa waa waalidka ama qaraabada ugu dhaw kuwaas oo ah kuwii u keenay booliska.

Markii ay *Horizon* la kulantay Muhumed,[4] waxa uu ku xidhnaa Xabsiga Gabiley oo uu ku qaadanayey xukunkiisa.

> Wax su'aal ah oo la I weydiiyey ma jirin fursadna la iima siin aan hadal ku yidhaa maxkamadda dhexdeeda. Garsoorihii waxa uu yidhi waxa aad caasiday waalidkaa wuxuna igu xukumay saddex billood oo xabsi ah. Waalidkaygu may iman maxkamadda aniguna maan haysan qareen.

Hooyada iyo Abtigii Abokor ayaa geeyey maxkamadda Burco.

> Markii kaliya ee aan hadlay waxay ahayd markii garsooruhu I weydiiyey da'dayda iyo si aan u sharraxo sidii aan danbiga u sameeyey. Garsooruhu ma uu xusin qodob sharci. Waxa uu weydiiyey hooyaday ciqaabta ay doonaysaa waxa ay tahay. Waxa ay ku jawaabtay in ay doonayso in la ii diro xabsiga. Wax ciqaab ah layguma xukumin waxana la ii qaaday xabsiga Burco muddo aan xaddidnayn. Uma malaynayo in aan xataa racfaan ka qaadan karayay maadaama ayna jirin kiis haboon ama xukun.

Iyada oo lagu sallaynayo daraasaddii *Horizon* iyo adeeggii sharci ee ay bixisay illaa hadda, xukunka Waalid-caasigu waxa uu u dhaxeeyey, Dhinaca inamada " in uu timo dheer leeyahay" dagaal, dugsigii oo uu ka tegay ama intaas oo la isku daray, cabbista sigaarka, cunista *qaadka* Dhinaca Hablaha " in ay u dhaqmaan si anshax xun." Inamada iyo hablahaba waxa xidha waalidkood marka ay isku dayaan in ay dibadda u tahriibaan. "[5]

[4] Dhammaan magacyada carruurta waa la baddalay si loo illaaliyo sirtooda.

[5] Tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan xadhiga caruurta ee isku dayaya in ay tahriibaan, eeg warbixintii *Horizon* ay soo saartay March 2020, *Falcelinta Sharciga ee Tahriibta*, Warqadda Falanqaynta 2.

Cilmi waxa lagu xukumay Waalid-caasi oo ay ku xukuntay maxkamadda Burco markuu ahaa afar iyo toban waxaanu ku qaatay siddeed iyo toban billood Xabsiga Mandheera markii ay *Horizon* waraysiga ka qaaday.

> Muranka aniga iyo waalidkaygu muddo ayay socotay maadaama aan cabbi jiray sigaar qaadkana cuni jiray dugsigana aanan tegi jirin. Aabbahay waxa uu go'aansaday in uu i xidho. Kadib markii aan bil ku qaatay saldhigga booliska, maxkamadda ayaa la i geeyey garsoorihiina waxa uu igu xukumay 18 billood. Aabbahay in ka yar ayuu doonayey, sida lix billood.

February 2019, Hoodo, gabadh yar oo jaamacadda ardayad ka ah, waa la xidhay kadib markii khilaaf soo kala dhexgalay iyada hooyadeed iyo walaasheed. Waxa ay xadday telefoon waxayna qorshaynaysay in ay u socdaasho Yurub. Walaasheed ayaa u sheegtay waalidkeed aabaheed baana booliska u gacan geliyey si ay u xidhaan. Maallintii ku xigtay, maxkamadda ayaa la hor keenay waxana lagu xukumay caasi-waalideen. Hoodo weligeed sharciga kamay hor iman maanta ka hor. Lama siin fursad ay ku hadasho ama isku difaacdo. Codsi ka yimid aabbaheed, waxa lagu xukumay 18 billlood oo xabsi ah. Markii ay la hadashay *Horizon*, carqaladda ku timid waxbarashadeedu waxa ay ahayd arrinta maskaxdeeda ku weyn.

> Aad Ayaan uga xumahay xaaladdan oo dhan. Waxa aan dareensanahay in waqtigaygii igaga dayacmay xabsiga. Mustaqbalkaygii iyo waxbarashadaydiina waa la carqaladeeyey. Waxa aan u baahanahay in la I sii daayo, si aan Jaamacadaydii ugu noqdo.

Qoyska Hoodo waxa ay ahayd in ay dhegaystaan sababta ku kalifaysay in ay guriga ka tagto, in ay kala hadlaan halista tahriibta kana caawiyaan sidii ay xal ugu heli lahayd jahawareerka ay ku sugan tahay. Waxay ahayd in ay la kulmaan dhibanaha, ujeediyaan cudurdaar una soo baddalaan telefoonkii laga xaday. Halkay sidaa ka samayn lahaayeen, waxa ay ku xidheen xabsi, waxa ay ka hor joogsadeen waxbarashadeedii manay baadhin sababta ay tallaabadaa u samaysay.

Sarkaal Booliska Boorama ka tirsan ayaa tibaaxay xaqiiqada ah in waalidka qaarkii u soo diraan xataa carruur aad u yar si ay xabsiga u dhigaan.

> Waxa aanu aragnaa kiisas badan oo ayna waalidiintu rabin in ay masuul ka noqdaan carruurtooda. Carruurtu aad ayay qaarkood u da' yar yihiin sida sagaal jir. Inta badan waxa aanu isku daynaa in aanu mushkiladda ku xallino dibadda xabsiga. Balse waxa jira carruur dib noogu soo noqda, waalidkoodna si joogto ah u codsadaan in loo xidho. Sidaa awgeed, waxa aanu ka qabana laba illaa saddex

maalmood. Qaar xataa da'doodu waa lix ama todoba – da'da intaa ka yar ma aqbalno. Laga billaabo toban jir, haddii ay yihiin caadaystayaal, waxa aanu xidhnaa laba ama saddex maalmood si aanu u baqo gelino.[6]

Qaar kamid ah boolisku waxa ay qirayaan saameynta taban ee uu xabsigu ku leeyahay ilmaha, waxayna xuseen in ay uga digaan in waalidku keeno ubadkooda saldhigga. Baadhe ka tirsan saldhigga booliska ee Laascaanood ayaa sheegay dhacdo shan carruur ah ay keeneen waalidkood oo ka cabanayey in ay "habeenka oo dhan wadada fadhiyeen oo ay dhibaato u gaysanayeen dadka wadada maraya."

Marka ay carruurtu waqti ku qaataan saldhigga, waxa aanu ku qancinaa waalidkood in ay guryahoodii ku celiyaan carruurta maadaama saldhiggu aanu ahayn meeshii u fiicnayd ee ay joogi lahaayeen carruurtu, gaar ahaan marka dad waaweyn oo kale ku xidhan yihiin saldhigga.[7]

Waraysi aad u murugo badan, oo ay ka muuqatay niyad-jab, gabadh ay walaalo yihiin wiil dhallinyar ah oo ku mamay cunista qaadka oo cidhiidhi geliyey Nolosha qoyskooda, ayaa u hadashay qoysas badan oo aaminsanaa in ay xaltahay xadhiga carruurta waalid caasiga samaysaa.

Waan jecelahay walaalkay waxaanan doonayaa kaliya in caafimaadkiisu ka soo reeyo. Isla markaa uu awood u yeesho in uu wax qabsan karo isaga oo aan qaad cunin. Ma doonayo in uu sannad xabsi ku jiro, balse 4-6 billood, inta mukhaadaraadku ka baxayo jidhkiisa isla markaa uu ka fikirayo dhaawaca maskaxeed iyo maaliyadeed ee uu qoyska soo gaadhsiiyey. Waxa aan aaminsanahay in dhawrka billood ee uu xabsiga ku jiraa ay baraarujin doonto. Halkaas kuma heli doono qaad waxana laga yaabaa in maskaxdiisu saafi noqoto duruuftiisuna ka fiicnaato.[8]

Balse sida ay tibaaxeen saraakiil badan oo ka tirsan xabsigu, tirada maxaabiista inta ay baxaan dib falkii u caadaysatay aad ayay u sarraysaa. Maadaama aanu xabsigu lahayn qayb gaar ah oo lagu xidho dhallinyarta ku xukuman waalid caasigu, waxa ay qolka la wadaagaan maxaabiis ka da'weyn oo ku xukuman danbiyada sida dilka iyo kufsiga. Sida uu sarkaal xabsiga Burco ahi u sheegay *Horizon:*

*Dhexgalka ay la samaynayaan maxaabiista kale waxa ay saamayn taban ku leedahay naftooda. Marka la sii daayo, waxa jirta fursad aad u sarraysa in ay ku gaystaan danbi ka culus kii hore ee waalid caasiga oo ay xabsigana dib ugu soo noqdaan.*

[6] Waraysi lala yeeshay Moussa Abdillahi Hanfi, Madaxa Saldhigga Dhexe ee Boorama, 27 May 2015.
[7] Waraysi lala yeeshay Jama Farah Abdillahi, Madaxa Baadhista ee Saldhigga Dhexe ee Laascaanood, 7 September 2015.
[8] Waraysi Boorama, 28 February 2018.

Qaar badan oo dhallinyarta ragga ah ee loo taxaabay xabsiga waalidkood oo ay caasiyeen awgeed waxa la arkaa hadhaw iyaga oo sameeey fal danbiyeed sida xadista telefoonada. Qoysaskoodu, iyaga oo ka cabsi qaba in ay sameeyaan fal danbiyeed ka culus waalid caasiga ayay u gacan geliyaan booliska.

Aqoondarada xanuunada dhimirka awgii, dhaqan ahaan way adag tahay in la qirto dhibaatooyinka xagga dhimirka, iyada oo gabi ahaanba ay maqan yihiin goobihii lagu dawayn lahaa xanuunada maskaxda iyo dhimirku, qoysasku waxa ay xabsiga u isticmaalaan halkii ay ka gayn lahaayeen xarrumihii ku habboonaa.

Aadan Maxamaed Cali, oo ah Garsoore Maxkamadda Degmada Boorama, ayaa tibaaxay murugadan " dhaqan ahaan xanuunada dhimirka mudnaanta lama siiyo." Cawaaqibtuna waxa ay noqotaa " halkii ay waalidku cusbitaalka gayn lahaayeen, waxa ugu fudud in ay xabsiga u taxaabaan." [9]

Sarkaal ay wada shaqeeyaan, Maxamed Axmed Maydhane, ayaa ka sheekeeyey khibradda uu u soo joogay ee ah in bulshada xabsiga u aragto xarrun caafimaad kadib markii waalidiintu ka codsadeen in uu ubadkooda xabsiga dhigo " muddo bil ah si uuna u helin *qaad* iyo mukhaadaraad."

> Markii aan arkay inankooda, waxa aan muuqaalka wejigiisa ka dheehday in uu dhimarka ka xanuunsanyo. Intii aan su'aalaha weydiinayey oo dhan, isagaa isla hadlayey. Waalidku waxa ay ii sheegeen in ay dib uga soo celiyeen UK markii uu yimid Somaliland, uu billaabay cunista qaadka iyo mukhaadaraad kale.Marka uu cadhoodu dadka waxbuu yeeli jiray. Haddii ay ka joojiyaan in ay qaad siiyaan, cadhada iyo waxyeeladu way sii siyaadaysay. Waalidku may garanayn si ay u caawiyaan. Maan qaban kiiskiisa. Waxa aan u sheegay in ay ku wacan tahay in ay geeyaan cusbitaal halkaas oo lagu daaweeyo halka sartu ka qudhantay, oo ah xannuunka dhimirka." [10]

[9] Waraysi Boorama, 28 February 2018.
[10] Waraysi Boorama, 28 February 2018.

## Xabsiyaynta Marka Koowaad, Danbiyo Yaryar

Inta badan dadka ay *Horizon* u fidisay taageerada sharci waa wiilal dhallinyar ah oo ku kacay danbiyo fudud sida dhaawaca, dagaal kooxeed iyo xadis. Sida lagu xusay kiisaska Maxamed (Taxanihii 1aad) iyo Bukhaari (Taxanihii 3aad), iyo kuwo kale oo badan, carruurta iyo dhallinyarta Somaliland waxa xabsiga ay ku qaataan muddo dheer – mararka qaar sannado – danbiyo sida telefoon ay xadeen, iyada oo ay tahay markii koowaad ee danbi noocan ah ay galaan. Tusaaleyaasha qaar, carruurta iyo dhallinyarta xabsiga ku jiraa waxa ay sheegaan in ayna falkaa ku lug lahayn balse lagu xukumay danbiga iyada oo ay sidaasi jirto.

Wiil 17 jir ah, Cabdirisaaq Xassan Cabdi waxa uu ku ciyaarayey fiidyawga ciyaar ku jirta isaga oo joogay magaaladiisa Wajaale markii boolisku qabteen isaga iyo saddex asxaabtii ah. Laba kamid ah saddexda uu la joogay ayaa soo xaday telefoon, kaas oo uu Cabdirisaaq sheegay in aanu ka war qabin. Waxa lagu xukumay laba sanno oo xabsi ah, ciqaab qalafsan oo aan u dhigmin xataa haddii uu ka qayb qaadan lahaa xadista moobilka. Markii la xidhay waxa uu dhiganayey dugsiga, Fasalka 7aad. Markii ay *Horizon* waraysatay April 2019, waxa uu ku jiray Xabsiga Gabiley, isaga oo qolka la wadaagayey dad waaweyn oo maxaabiis ah oo uu ka cawday in ay six un ula dhaqmaan. Isaga iyo qoyskiisuba waxa ay ka werwersanaayeen waxbarashada dhaaftay iyo saameynta ay ku yeelan doonto mustaqbalka fog. Qoyskiisu usbuuc kasta waxa ay ku soo booqdaan xabsiga, inkasta oo ay qaali ku tahay in ay sidaa sameeyaan.

In dhallinyarta sida Cabdirisaaq oo kale loo diro xabsigu waxa ay ka baddalayso ma jirto duruuftii marka horeba keentay xabsiga isaga iyo kuwa la faca ahba.

## In Waqtiga iyo Hantidaba la geliyo sidii Diiradda loo saari lahaa Danbiyada Culus

Tacab khasaaraha, kharashka iyo murugada ka dhalata marka ay booliska iyo garsooreyaashu ku adkaystaan xabsiyayntu in ay xal u tahay dhibaatooyinka bulshadu waxa si cad loogu muujiyey kiiskii *Horizon* ka shaqaysay ee Wajaale. January 2020, Ismaaciil (14), Sanadin (15) iyo Cabdifataax (15) waxa ay ka tirsanaayeen koox koob-iyo toban ah oo dad'doodu u dhaxayso 12-16 sanno oo ku dagaalamay dariiqa. Intii dagaalku socday, wiil dhallinyar ah ayaa ku dhaawacmay muraayad gaadhina waa la jabiyey. Qoysaskii wiilashu waxa ay heshiis la gaadheen dhibaneyaashii in ay magdhaw bixiyaan. Balse natiijadii booliska ayaa ku gacan saydhay. waxa ayna xidheen koob-iyo tobankiiba waxayna ku qaadeen in ay gaysteen dhaawac fudud iyo burburin hanti

waxayna ku xidheen saldhigga booliska ee Kalabaydh muddo laba usbuuc ah, halkaas oo 21 kiiloomitir u jirta magaaladoodii. Wiilashaasi saldhigga iyo maxkamadda midna kumay haysan qareen. Markii maxkamaddu socotay, garsoorihii sidoo kale waxa uu ganafka ku dhuftay heshiiskii magadhawga. Sidii booliska oo kale, waxa uu aaminsanaa in xabsiyayntu tahay sida ugu fiican ee kiiskan lagu xallinayo. Umuu ogolaan wiilasha iyo aabbaha wiilka dhaawacmay, in ay hadlaan intii dhegaysigu socday. Balse, waxa uu garsoorihii ku xukumay mid kasta oo kooxdii kamid ah saddex sanno oo xabsi ah iyo 3 milyan oo SL Shillin ganaax ah. Waxa loo diray Xabsiga Gabiley oo u jira 37 kiiloomitir Wajaale, si ay ugu qaataan mudada xabsigooda.

Intaa kadib qoysaskii waxa ay qabsadeen qareen si uu kiiska ugu gudbiyo Maxkamadda Racfaanka. Wiilkii yaraa ee dhaawacu soo gaadhay ayaa u sheegay maxkamadda in uu ku faraxsanaa in qoysasku ku heshiiyeen in arrinta magdhaw lagu xalliyo iyo in uuna rabin in tallaabo dheeraad ah oo ciqaab ah laga qaado. Maxkamaddii Racfaanku way aqbashay heshiiski ay qoysasku gaadheen. Maxkamaddu waxa ay ku soo koobtay xabsigii todoba billood iyo 300,000 SL Shillin oo ganaax ah. Waa la sii daayey March 2020 kadib markii qoysku u iibiyeen intii uga hadhsanayd xukunka sida uu sharcigu dhigayo.[11]

Go'aanka ay ku adkaysteen booliska iyo garsooruhu in ay dacwad ku soo oogaan kadib xabsi u diraan wiilashaasi waxa uu waqti ka lumiyey booliska, garsoorka iyo dhaqaalihii xabsiga, waxanu saameyn taban ku yeeshay wiilashaas iyo qoyskooda sida aynu hoos ku falanqaynnay.

## Waa maxay sababta Dhallinyarta Xabsiga la dhigayaa ay Arrimaha u sii Cakiraysaa

Sida ku cad kiisaskaa iyo qaar kale oo badan, xabsiyayntu waxa ay saameyn taban oo jidheed, maskaxeed iyo caadifadeedba ku leedahay badqabka carruurtaas. Saameyntan caafimaad ee tabani waa mid daba jiitami karta illaa marka ay waynaadaan waxayna sababi kartaa xanuun daba dheeraada oo dhimirka ah sida isku-buuq iyo werwer. Carruurta iyo dhallinyarta, iyada oo lagu xisaabtamayo in aan garaadkoodu dhammays ahayn, maskaxdoodu diyaar uma aha qaabka looga soo kabto dhibaatooyinka iyo halista ee laga dhaxlo xabsiga. Halistu waa mid sii daran marka lala xidho dad waaweyn, sida Cabdirisaaq oo kale, taas oo caan ka ah Somaliland. Cabdirisaaq waxa uu ka yidhi in lagula xidhay meel dad waaweyn oo danbiyo culus gaystay.

[11] Xeerka Ciqaabta waxa uu u ogolaanayaa eedaysaneyaashu in ay iibsadaa xukunka halkii ay xabsiga ku qaadan lahaayeen, danbiyo yaryar oo xukunkoodu ka yar yahay hal sanno.

> Waxa ay nala wadaageen sheekooyin. Mararka qaarna waxay ahaayeen sheekooyin xun. Dadkii waa weynaa way i riixeen wax aan sameeyaana may jirin maadama aan ka yaraa. Aad ayay ii niyab jabisay. Dhallinyarta waa in aan lagula xidhin dadka waaweyn isku qol, waxa ay halis ugu jiraan in dhaawac la gaadhsiiyo.[12]

In ay dugsiga tagi waayaan caruurtu waxa ay gaadhsiinaysaa dhibaato weligood la socota, mararka qaara, waxa ay yaraysaa fursaddii ay dib ula midoobi lahaayeen bulshada. Kiiska kooxdii Wajaale, saddex kamid ah afartii wiil ee ay waraysatay *Horizon* waxa ay xuseen in ay gebi ahaanba joojiyeen dugsigii xabsiga ay galeen awgii. Qaar kamid ah wiilashasi waxa ay sheegeen in la faquuqay iyada oo lagu salaynayo waqtigii ay ku qaateen xabsiga.

Sadaam oo ah wiil 15 jir ah ma waajihi karo in uu ku noqdo dugsiga wixii dhacay awgii.

> Dhib badan baan maray. Had iyo jeer dhallinta kale ee dugsigu way igu dacaayadayn jireen iyaga o oleh ' waa mid kamid ah kuwii la xidhay.' Way idaba wadeen arrintaa ilaa aan dugsigii ka tago. Welina kuma noqon.[13]

Xubin kale oo ka tisan kooxdii Wajaale, oo isna lagu dacaayadeeyey in la xidhay ayaa kadib dhacay ardaydii ay isku fasalka ahaayeen, wuxuuna yidhi " xabsigu dhaawac ayuu soo gaadhsiiyey hiigsigaygii iyo qayb ahaan mustaqbalkaygii oo uu lumay."

## *Dhibaato aan Loo baahnayn ayay u Horseedaysaa Xubnihii Qoyska*

Xabsiyaynta dhallaanka waxa ay sidoo kale culays dhaqaale ku haysaa qoyska, marka lagu daro culayska caadifadeed. Kharashka safarka maxkamadaha, saldhigyada booliska, xabsiyada iyo ganaaxa si ay usoo daayaan ubadkooda waa kharash qoysaska danyarta ahi ayna awoodin. Kiiskii kooxda Wajaale, waxa lagu xidhay saldhigga booliska ee Kalabaydh, hooyooyinka ubadkaasi waxa ay u qaadi jireen cuntadooda saddexda waqtiba maalin kasta, taas oo ahayd arrin ay u hureen naftooda. Kadib markii wiilasha loo dhaadhiciyey Xabsiga Gabiley, qoysaskoodu waxa ay ku khasbanaadeen in ay u diraan lacag ay cunto ku iibsadaan kadib markii kharashka safarkoodu ku libin-laabmay. Arrintani saddex kamid ah qoysaska waxa ay gelisay deyn culus oo ay ku jirtay hooyo odaygeedii ka dhintay oo korinaysay todoba carruur ah kaligeed. Hooyada dhashay Ismaaciil Nuur, Xaali Nuux Bulxan, waxa ay u sheegtay *Horizon* in ay ka baxday $1100, lacagtaas oo qayb ahaan ay soo amaahatay. Sidaa awgeed waxa ka kacay ganacsigeedii yaraa ee ay kala soo bixi jirtay nolol maalmeedka – oo ahaa dakhliga kaliya ee qoysku helo –

[12] Waraysi Gabiley, 18 April 2019.
[13] Waraysi Wajaale, 19 January 2021.

> Waxa isbaddalay noloshii qoyska. Waxa aan samayn jiray inta u dhaxaysa $30 illaa $50 maallin kasta. Balse waxa aan ku khasbanaaday in aan iibiyo wax kasta, oo ay ku jirto qalabkii si aan ugu bixiyo kharashaadkii xabsiga.
>
> Ma awoodo in aan bixiyo kharashka waxbarashada ubadkayga. Ismaaciil waxa uu tagi jiray dugsiga iyo madarasada, balse maadaama aan hadda awoodo mid kaliya, waxa uu tagaa kaliya dugsiga.[14]

Waayaha soo maray qoysaska wiilashani maaha mid iyaga gaar u ah. Farax Cumar Cali oo ah hooyo sideed carruur ah dhashay, waxa ay masuul ka tahay wiilka ay habaryarta u tahay oo 15 jir ah, qoyskana ka kaliya ee quudiya ah. 2019-kii, wiilkii ay habaryarta u ahayd waxa lagu xidhay Hargeysa telefoon uu xaday awgii. Farax waqti badan iyo lacag waxa ay gelisay sidii loo sii dayn lahaa wiilka. Waxa lagu xukumay saddex sanno oo xabsi ah. Waxa ay u dooday sidii wiilka ay habaryarta u tahay loogu xidhi lahaa meel u dhaw, halkii laga geyn lahaa Mandhera. Farax racfaan ayay ka qaadatay xukunka waana la sii daayey sideed billood kadib. Farax waxa ka baxay waqti badan intii ay ku soo booqanaysay xabsigii iyo codsigii ay ka codsanaysay masuuliyiinta xabsiga in ay xaaladiisa ka war-hayaan. Farax iyo carruurteedu tacab badan oo culays ah ayaa ku dhacay.

> Waxa aan dareemay xannuun badan iyo culays. Waxa aan ku khasbanaa in aan u lugeeyo maxkamadda maadaama aanan awoodin qiimaha baska. Waxa aan tagay maxkamadda in ka badan 20 jeer mudadii sideeda billood ahayd, inta badana si aan xog uga helo wiilka. Waxa ay igu qaadan jirtay laba saacadood oo lug ah si aan halkaa u gaadho. Tacab badan ayaa igu dhacay oo iga mashquuliyey ubadkaygii. Guriga Ayaan ku soo xidhi jiray ilmahayga 3, 5 iyo 7 jirka ah inta aan maxkamadda ku maqanahay. Waxay ahayd waqtigaa in aan shaqeeyo oo aan dakhli ugu soo xareeyo qoyska. Waxa aan ku khasbanaaday in aan deyn qaato aan ku sii daayo wiilka aan habaryarta u ahay.[15]

Wiilasha laga soo xidhay wajaale iyo wiilka ay farax habaryarta u tahay, kuwaasi oo ugu yaraan ay qoysaskoodu soo booqan karayeen waxay ahayeen qaar nasiib leh, sida uu tilmaamay suhayb, oo ah wiil 16 jir ah kaasi oo ku xidhnaa xabsiga Gabiley bishii April 2019.

> Qaar badan oo qoysaska kamid ahi ma awoodaan in ay soo booqdaan ubadkooda, gaar ahaan haddii ay ku xidhan yihiin gobol kale. Ubadku waxa ay ku khasbanaadaan in ay cuntada la wadaagaan maxaabiista kale ee qoyskoodu u keenaan cuntada.[16]

[14] Waraysi Wajaale, 19 January 2021.
[15] Waraysi Hargeisa, 29 April 2019.
[16] Waraysi Gabiley 17 April 2019.

Maaha wax lala yaabo in xadhiga iyo xabsiyaynta dhallaanka lagu xidhiidhiyo tirada sii kordhaysa ee danbiga dib loo gaysanayo. Daraasad ayaa muujisay in marka ay dadku aaminaan in nidaamka caddaaladdu uu yahay mid caadil ah, in ay u hogaansamayaan sharciga mustaqbalka. Balse marka si aan sinnayn loola dhaqmo dadka, iyaga oo aan fursad la siin lagu dhegaysto doodooda, sida kiiska kooxdii Wajaale, waxa aad u saraysa in ay sharciga ku xadgudbaan mustaqbalka. Ugu danbaynta, waxa ay curyaamisaa ammaanka bulshada ee mudada fog.

## In Mudnaanta la siiyo Ka hortagga Loona fidiyo Gargaar iyo Fursado kale

Inta badan waalidka, qoysaska, booliska, xeer-illlaalinta iyo garsooreyaasha ubadka u taxaaba xabsigu waxa ay laayihiin badiilkii kale ee ay samayn lahaayeen. Xukuumadda Somaliland waa in ay si degdeg ah u muujisaa hogaamin, maaha waaxda caddaaladda oo kaliya, balse bulshada oo dhan, in la qirto, kadib lala tacaalo halka sartu ka qudhuntay ee ku sababaya in ubadkani ku kacaan hab-dhaqan bulshada ka soo horjeeda sharcigana ka hor yimaadaan. Xukuumadda waxa saaran waajib in ay bulshada tusto in ay u shaqaynayso, hab ka hortag ah, kaas oo ah nidaam sugan oo la raaco, waxana la qaban karo billawgaba, si ***looga hortago*** danbiyada ay ubadkaasi ku kacayaan. In laga caawiyo ubadkaas iyo qoysaskooda inta ay la tacaalayaan xabsiga, dacwad oogista iyo xabsiyaynta, in la siiyo eedaysaneyaashaas taageerada ay u baahnaayeen iyo kormeerka ay u baahan yihiin si ay naftooda uga dheereeyaan danbiga ugana fogaadaan in ay ku noqdaan habdhaqankaa xun waa waajib xukuumad kastaa ayna iska indho-tiri karin.

Aad ayay u fududahay in la xuso in ay maqantahay dhaqaalihii. Balse waxa ka sii muhiimsan in la sharraxo culayska soo waajahaya maanta ubadkan reer Somaliland waa hoggaamin la'aanta ee xukuumadihii kala danbeeyey sidii ay xal ugu raadin lahaayeen waxa ku khasbaya ubadkan in ay qaataan dariiqaa qalloocan. Nolosha iyo maskaxaha iyo qoysaska uu burburiyey qaadku waa tuaasle kamid ah arrimaha aan tallaabada laga qaadin ee baahsan ee ku dirqinaya ubadkaas in ay danbiga gaystaan, qoysasku burburaan, xanuunada dhimirku kordhaan iyo cidhiidhiga buux-dhaafiyey xabsiyada.[17]

In loo helo xal halka dhibaatadu ka soo alkuntay maaha mid fudud si dhib yarna loo xallin karo. Balse shaqadu waa in ay meel uun ka billaabmataa, waxayna u baahan tahay in ay hadda bilaabmato, inaga oo dhammaanteen ka hawlgalayna. Hadafka in bulshooyinku horumaraan halkaas oo ilmaha iyada oo aan loo eegayn Nolosha dhaqan-dhaqaale ee qoyskiisa uu dareemayo ammaan, waxa ay u baahan tahay in aynu dhammaanteen dadaal weyn la nimaadno. Waxa ay arrintani degdeg noqonaysaa marka ilmahaa iyo qoyskoodu ay aad inoogu baahan yihiin maxaa yeelay duruufahooda ayaa ka dhigay inaanay awoodin in ay iyagu iskood u maareeyaan.

[17] Way adag tahay in la ilaawo daraasadda Machadka Nabadda iyo Xallinta Khilaafaadku waxa uu gorfaynayaa su'aasha qaadka oo ay kamid tahay doorka uu ku leeyahay rabshadaha dhallinyarta, iyo guul-darada xukuumadda Somaliland in ay wax ka qabato dhibaatada soona bandhigto xal.

Hay'adaha xukuumadda, waalidiinta, qoyska, hogaamiyaasha bulshada iyo macallimiinta iyo kuwa kaleba waxa bulshada ka saaran masuuliyad ay tahay in ay soo faragaliyaan kana hortagaan hab-dhaqanadaa xun. Waxa ay arrintani xaqiijinaysaa in ayna ubadkaasi u gacan gelin booliska, xeer-illaalinta iyo garsooreyaasha si ay uga jawaab celiyaan arrintan oo in ay dhaawac gaysato mooyee aan xal keenayn. Halkii ay si tartiib tartiiba ugu adeegsan lahaayeen xadhiga iyo xabsigaba, masuuliyiinta waaxada caddaaladdu waa in ay raadiyaan habab kale oo badiil ah si ay ubadkaa uga ilaaliyaan in ay galaan xabsi una joogi lahaayeen bulshada ay ka tirsan yihiin. Haddii aynu dhammaanteen qabano inta inala gudboon waxa aynu jabinaynaa meertadaa burburka xambaarsan ee ubadka loo taxaabayo xabsiga, la yaraynayo fursaddooda, iyo ugu danbaynta bulshadooda oo ah bulshadeena.

## IN AAD QAYB KA NOQOTID XALKA

### Maxaad Samayn Kartaa si aad u Caawisid?

Qofkastaa waxa uu gacan ka gaysan karaan sidii looga hortagi lahaa hab-dhaqankaa bulshada ka soo horjeeda ee ay ku kacayaan dhallinyartu si nidaamka caddaalad ciqaabeedku awoodda u saaro danbiyada culus, iyo marka xal kale la waayo oo loola tacaalo kuwa caadaysta danbiga. Waa danteena in la xaqiijiyo in aan dhallinyartaa la iska xidhin, lasoo eedayn, dacwad lagu soo oogin xabsigana loo taxaabin iyo in aan loo isticmaalin booliska iyo maxkamadaha badiilkii hay'adaha fidiya adeegga bulshada.

- Haddii aad tahay waalid, masuul ama macallin oo la kulmay qof dhallinyar ah oo aan amar qaadanayn, marka koowaad tallo ka raadso, gabi ahaan qoyska, bulshada – cuqaasha, xubnaha gudiyada bulshada, ururada dhallinyarada ama hay'adaha aan xukuumiga ahayn.
- Hadii uu jiro xubin qoyskaaga oo 17 jir ama ka yar oo loo xidhay danbi aan aad u cuslayn, raadi marka hore in lagu xallin karo heshiiska xeer-dhaqameedka ee lala galayo qoyska dhibanaha. Sharciga ayaa ogol arrintan. Carruurta ka yar 17 jir, Qodobka 67 ee Xeerka Garsoorka Carruurtu waxa uu ogol yahay heshiiska xeer-dhaqameedka si looga illaaliyo carruurtu in ay galaan xabsiga.
- Haddii aad tahay caaqil, hogaamiye diimeed ama bulsho, ka hadal masaajidka, goobaha bulshadu ku kulanto ama goob kasta oo munaasib ah sida ugu wanaagsan ee ubadka loogu hayn lahaa dugsiga loogana hortagi lahaa in la xidho, dacwad lagu soo oogo ama xabsiga loo taxaabo waalidkood oo ay caasiyeen awgii iyo danbiyada aan cuslayn sida markii koowaad noloshooda oo ay wax xadaan.
- Haddii aad tahay macallin ama aad ka shaqaysid dugsi ama jaamacad, la wadaag xogtan waalidiinta ardayda. Xaqiiji in waalidiintu fahansan yihiin sharciga, iyo

cawaaqibta mudada dheer ee xabsigu ku leeyahay ubadka iyo dhallaanka, iyo sidii ubadka looga badbaadin lahaa xabsiga looguna hayn lahaa dugsiga.

- Haddii aad ka shaqaysid ganacsigaaga gaarka ah, la wadaag xogtan asxaabtaada. Ka fikir in aad siin kartid fursado tababar, nidaam dabagal iyo shaqo dhallinyartaa si ay khibrad uga helaan goobta shaqadaada.
- Haddii aad tahay saxafi ama aad warbaahinta ka shaqaysid, isticmaal khibradaada si aad ugu wacyigalisid ku wacyi gelinaysid bulshada halista iyo dhaawaca xabsigu u leeyahay dhallaanka iyo noloshooda, qoyskooda iyo bulshada oo dhan.
- Haddii aad tahay sarkaal booliis, ka fikir in xadhiga ilmaha ama dhallaanka ee danbi fudud uu yahay mid daruuri ah. Hab-dhaqankaa si fudud ma loogu xallin karaa cudurdaar uu jeediyo, ama heshiis dhaqameed lala galo qoyska dhibanaha?
- Haddii aad tahay xeer-ilaaliye ama garsoore, door muhiim ah ayaad ka ciyaari kartaa sidii loo yarayn lahaa xadhiga, dacwad-oogista iyo xabsiyaynta ubadka iyo dhallaanka. Isticmaalka Xeerka Garsoorka Carruurta si aad u caawisid ubadka iyo dhallaanka si looga illaaliyo xabsiga. Kiiska ma lagu xallin karaa xafis garsoore, cudurdaar qoraal ah, amar in uu dugsiga aado ama heshiis lala galo dhibanaha?
- Qof kasta waxa uu gacan ka gaysan karaa sidii ubadka iyo dhallaanka looga illaalin lahaa xabsiga adiga oo la wadaagaya xogtan qoyskaaga, jaarka, asaxaabta dadka goobta aad ka wada shaqaysaan iyo bulshada.

*Waxa aanu soo dhawaynaynaa talobixinaha ka imanaya akhristayaasha ee khusaysa sida arrinta lagaga hadlayo warbixintan loogu faafin lahaa si baahsan dhagaystayaal kala duduwan tiiyoo ujeedadu tahay ilaalinta dhamaan caruurta ku nool Somaliland.*

***Hay'adda Horizon waa Urur Maxalli ah oo ka hawlgala Somaliland kana shaqeeya sidii loo horumarin lahaa sarreynta sharciga iyo xuquuqal insaanka. Warbixinaha iyo daraasadaha aanu soo saarnaa waxa ay daah-furaan arrimaha taaggan ee lagu ogaaday shaqada aanu qabano. Waxa ay bixiyaan xog iyo gorfeyn loogu tallo galay in ay cariso doodda ka dhaxaysa daneeyeyaasha, dadweynaha iyo deeq-bixiyaasha iyo in ay kor u qaado siyaasadaha xukuumadda iyada oo lagu salaynayo qadarinta xuquuqal insaanka, sarraynta sharciga iyo dhiirigelinta isku filaanshaha.***

***Si aad wax badan uga ogaatid hawsha aanu qabano, fadlan booqo degalka internet-ka aanu ku leenahay ee www.thehorizoninstitute.org nagala socda Twitter @Horizon_SL iyo Facebook @HorizonInstituteSomaliland.***

***Wixii macluumaad dheeraad ah ee aad u baahan tahay, waxa aad nagala soo xidhiidhi kataa email-ka info@thehorizoninstitute.org iyo telefoonada +252 523603 / 0634717933***

## NALA SOO XIDIIDH

6th Floor, Omar Hashi Building
Hargeisa, Somaliland
+252 523603 / (0)634717933

1st Floor, Sagal Jet Building
Burao, Somaliland
+252 (0)634349469

info@thehorizoninstitute.org

## Soo booqo baraha internet-ka

www.thehorizoninstitute.org

Twitter: @Horizon_SL

Facebook: @HorizonInstituteSomaliland

**All photos by Petterik Wiggers**